

September 2024

Waanu ku salaamaynaa!

Hadda waa wakhtigii la iska tallaali lahaa cudurka covid-19 iyo hargabka. Inta lagu jiro xilliga 2024-2025, labada tallaalba waxaa la bixinayaa isku mar intii suurtagal ah. Sababta aanu adiga kuula soo xiriirnay waxaa weeye in aanu u aragno inay muhiim tahay inaad hesho macluumaadka ku saabsan cudurka covid-19 iyo tallaalada hargabka.

Cudurka covid-19 iyo hargabku waa cudurro fayras ah oo lagu garto qandho, qufac iyo jir xanuun. Faafida cudurku aad ayuu u sarreeyaa oo dadka qaar cudurka qaadaa waxay halis ugu jiraan inay si daran ugu bukoonaadaan. Markaad is tallaasho, waxaad helaysaa difaac wanaagsan oo ka hortegeyo khatarta jirrada - tallaaladu wuxuu badbaadiyaan nolosha.

Gävleborg gudaheeda tallaalku waxa uu bilaabmayaa talaadada 15 oktoobar, 2024

Sidan ayaad samaynaysaa, haddii aanad hore laguugu soo dirin warqad ay ku qoran tahay wakhtiga iyo goobta:

- Ballan qabsi, dib u ballansasho, baajin waxa laga samayn karaa si dhijitaal ah bogga 1177.se/Gavleborg
- Sidoo kale waad iska iman kartaa adiga oo aan wakhti qabsan (drop-in), wakhtiyada waxaad ka heli kartaa bogga 1177.se/Gavleborg
- Fadlan dib uga ballanso ama ka noqo ballanta adiga oo isticmaalaya bogga 1177.se/Gavleborg, si qof kale loo siiyo wakhtigaaga. Haddii aadan haysan aqoonsiga bangiga (bank-id), waxaad nagala soo xiriiri kartaa telefoonka 026-15 03 00. Waxaa jira dad badan oo na soo waca sidaa daraadeed waxa dhici karta in wakhtiga sugitaanku dheeraado. Sidaa darteed, fadlan marka ugu horre ka beddelo ballantaada dhijitaalka haddii aad fursad u haysato.

Waxaa adiga lagugula talinayaa inaad iska tallaasho covid-19 xilliga dayrta haddii mid ka mid ah kuwan soo socdaa ay sax yihiin:

- Waxaad buuxisay 65 sano sannadkan, ama aad ka weyn tahay.
- Waxaad qabtaa jirro ama shay kale oo kor u qaadaya halista ah inaad si xun ugu jirranto. Waxaad sidoo kale noqotay qof buuxiyey 18 sano sannadkan ama aad ka weyn tahay.
- Waxaad tahay qof uur leh oo ku jira usbuuca 12aad ka dib.

Waxaa adiga lagugula talinayaa inaad iska tallaasho hargabka haddii mid ka mid ah kuwan soo socdaa ay sax yihiin:

- Waxaad buuxisay 65 sano sannadkan, ama aad ka weyn tahay.
- Waxaad tahay qof uur leh oo ku jira usbuuca 12aad ka dib.
- Waxaad qabtaa jirro ama shay kale oo kor u qaadaya halista ah inaad si xun ugu jirranto. Waxay khuseysaa qof walba laga bilaabo da'da 6 bilood.
- Waxaad la nooshahay qof difaaca jirkiisu uu aad daciif u yahay.

Gal bogga 1177.se/Gavleborg si aad wax badan uga akhrido dadka lagula talinayo inay is tallaasho.

Si diiran ayaa laguu soo dhaweynayaa inaad is tallaasho!

Waxaa salaam saaxiibtinimo kugu salaamaya,
Shah Jalal, dhakhtarka ka hortagga caabuqyada, ee Gobolka Gävleborg
Maria Larsson, isuduwaha tallaalada, ee Gobolka Gävleborg